

SOMALISKA

KU SOCOTA QOFKA BUKAANKA AH

**SKaPa – Diiwaan  
qaran ee tayada  
daryeelka ilkaha**

**Warbixin dheeraad ah**

Telefoon 054-615000

[www.skapareg.se](http://www.skapareg.se)

[www.kvalitetsregister.se](http://www.kvalitetsregister.se)



DIIWAANKA TAYADA  
DAAWEYNTA  
DALOOLKA IYO  
BOLOLKA ILKAHA

SVENSKT  
KVALITETSREGISTER  
FÖR KARIES  
OCH PARODONTIT

**Si kor loogu qaado tayada**  
daryeelka caafimaadka waxaan  
warbixinaha qofka ilkaha ka  
xanuunsan ku gudbineynnaa  
**SKaPa**, diiwaan qaran oo loogu  
talagalay daloolka iyo bololka ilkaha.

#### Diiwaanka waxaa looga dan leeyahay in kor loogu qaado tayada

Diiwaankaan tayada daryeelka caafimaadku wuxuu waxtar u  
leeyahay sidii loo heli lahaa aqoon cusub oo sida ugu wanaagsan  
wax looga qabanaayo meelo badan oo daryeel caafimaad  
Diiwaanka tayada daryeelka waxaa lagu ururiyaa waxbixinaha  
laga qoro baaritaanka, daaweynta iyo natijada dad bukaan ah oo  
ku nool dhammaan dalka qaybihiisa.

#### Waxaad gacan ka geysaneysaa helitaanka daryeelka wanaagsan

Warbixinaha lagaa ururiyo waxaa ku caawineysaa horumarinta  
daryeelka caafimaadka. Markii marar badan laga qaybqaataba,  
waxaa kordhaya in la helo natijo lagu kalsoonaan karo. Kadibna  
waxaa natijadaas u isticmaaleynna hawlahayaga sii wanaajinta  
daryeelka.

#### Waxaa ku ilaalinaya xeerka qarsoodiga macluumaadka.

Warbixinaha lagaaga ururiyo diiwaanka tayada waxaa ilaalinaya  
xeerka qarsoodiga macluumaadka oo waxaa loo maareynaya sida  
warbixinaha bukaanka ka yaal goobaha daryeelka caafimaadka.  
Warbixinaha lagaa qorayna waa laga saaraya diiwaanka marka  
ay dhammaato baahida loo qabo. Warbixinaha bukaanka  
oo ku qoran diiwaanka tayada waxaa lagu maamulaa xeerka  
warbixinaha bukaanka.

#### Warbixinahaaga bukaanka

Warbixinaha kugu saabsan waxaa laga soo qaadanaya diiwaanka  
dhakhtarkaaga ilkaha. Dhkhtarka ku daaweyya oo qura ayaa wax  
ka ogaan kara warbixinaha ku saabsan caafimaadkaaga.

Warbixinaha laga qoray habka laguu daaweyey oo magacaaga iyo  
lambarkaaga aqoonsiga laga saaray ayaa lagu soo ururiyey dadka  
kale oo bukaanka si loogu isticmaalo baaritaan qaran. Waxaa  
kaloo warbixinahaas loo isticmaali karaa ujeeddo cilmi-baaris.

Markaad doonto ayaad warbixinahaaga ka saari kartaa diiwaanka  
amaba diidi kartaa in lagu diiwaangeliyo. Haddii aad sidaas  
dooneyso la xiriir dhakhtarka ku daaweyya.

Haddaad dooneyso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan  
SKaPa, waxaad ka heli kartaa bogga internet ee diiwaanka ama  
telefoonkaan kula xiriir Skapa 054-615000

Haddaad dooneyso in koobbi lagaa siiyo warbixinaha kaaga  
qoran SKaPa, kala xiriir Hans Ramstedt, oo maamulka gobolka  
Värmland wakiil uga ah warbixinaha dadka, kaas oo mas'uul ka  
ah bixinta koobbiyada sida waafaqsan xeerka warbixinaha qofka  
(PuL), qodobkiisa 26aad. Waxaa Hans Ramstedt laga la xiriiri  
karaa telefoonka 054-615000.